Female Genital Mutilation (FGM): Naafaynta Xubinta Taranka Dumarka

Gudniinka dumarka oo English ka loogu yaqaano (Female Genital Mutilation) ama naafaynta Xubinta taranka ee Dumarka.

Gudniinka dumarka waa dambi gudaha Australia.

Gudniinka dumarka waxaa sababa kala duwan loogaga dhaqmaa in ka badan 48 wadan oo aduunka ka mid ah.

Sikastaba ha ahaatee waa dambi Australia dhexdeeda.

May 2014,gobalka NSW wuxuu ka fadhiistay sharciga danbiyada waxaana dib u eegis lagu sameeyey ka soo horjeedka Gudniinka dumarka iyo in lakordhiyo ciqaabta qofka danbigaa lagu helo mudo ku siman 21 sano.

NSW waxay sharciyeysay in ay dambi tahay Gudniinka dumarka. Sharciga wuxuu sheegayaa inay dambi tahay in:

- La gu sameeyo Gudniinka dumarka gabadh yar ama gabadh wayn ama qof dumar ah oo qaangaadhay
- Aad kasaartid gabadh yar ama qof dumar ah gobolka NSW iyagoo lasoo gudayo markaas
- Aad bixisid lacag gudniin lagu fulinayo
- Aad kula talisid qof inu gudniin ku sameeyo gabadh

January 2, 2014 waxaa maxkamad ku taal Manly, NSW lasoo taagay aaba Indonesian ah oo abaabulay inuu soo gudo gabadh yar uu dhalay xili uu u kaxeeyey wadanka dibadiisa.

May 24, 2014, Kiis gaar ah oo ku saabsan kalkaaliso howlgab ah, Imaam iyo hooyo, kamid ah koox yar oo ka tirsan Indian Community ee Sydney, ayaa lagu soo oogay dami ah gudniin ay ku sameeyeen laba hablood oo yaryar gudaha Australia.

Waxaa jira 4 nooc oo aasaasi u ah gudniinka haweenka:

Nooca 1 Goynta inta kore ee kintirka, ama gonta kintirka qayb ama dhamaan-kintirka goontiisa.

Nooca 2 Goynta kintirka oo qayb laga tago, ama goyn guud oo faruuryaha iyo dibnaha lawada gunjaro.

Nooca 3 Kintirka oo qayb ama dhammaan lagooyo iyo xubinta taranka oo la tolo/ oo daloolka cidhiidhi laga dhigo

Nooca 4 waa nooca aan qeexneen:

• muditaan, daloolin, ama jeexid Kintirka iyo / ama dibnaha

• kala jiidid kintirka ama iyo dibnaha

• solid iyadoo la gubayo kintirka iyo bishimaha hoostooda iyo hareerahooda

• Xoqitaanka bishimaha ka sareeysan xubinta taranka dumarka ama jeexan

Gudniika dumarka wuxuu layimaadaa saamayn fara badan oo waxyeello u gaysata caafimaad xiliga lagudo laga bilaabo ilaa nolosheeda oo dhan. In kasta oo uusan mid ka mid ah buugaag ta diimeed: ee Tawreed, Baybalka iyo Quraanka aysan ugu yeedhin gudniinka gabdhaha, Culimad Muslimka qaar ka mid ah oo taageero falkan waxay ku doodaan inay tahay arintan mid kamid ah diinta Islaamka.

Si kastaba ha ahaatee, 22 iyo 23-kii bishii November ee 2006 eyey sheekhyo ka mid ah kuwa ugu sarsareeya culimada Ismaalamka oo iskaga yimid dunida oo dhan waxay ku kulmeen shir lagu qabtaya Al Azhar University kaas oo hoos yimaada Grand Mufti ga Egypt, Prof. Dr Ali Goma'a.

Kadib warbixino caafimaad oo dhowr ah ayey soo bandhigeen Dhakhaatiir caalami ah oo ka kala yimid Masar, Ethiopia iyo Germany waxayna warbixinaadaasi ku saabsanaayeen waxyeellada daran ee naafaynta saxaaxa dumarka, dhamaana way isku raaceen wayna ku wada dhawaaqeen in naafaynta saxaaxa dumarka ay tahay ciqaab iyo dembi adag oo ka soo horjeeda banii'aadaminnimada iyo in caadadaas mar dambe ayna ku dhaqmin muslimiintu.

Culimada shirka ka soo qaybgalay waxay ahaayeen:

- Grand Mufti oo agaasimaha Al-Azhar: Prof. Dr. Ali Goma'a
- Grand Sheikh of Al-Azhar: Prof. Dr Mohamed Sayed Tantawi,
- Wasiirka Diinta ee Masar: Prof. Dr. Maxamuud Xamdi Zakzouk;
- Sheikh Hissein Hassan Abkar ka Chad,
- Imam Mahammadou Diallo ka Mali
- Imam Bal ElBechir ka Mauritania,
- Sheikh Mohamed Darassa From Ethiopia,
- Imam Tarafa Baghrajati ka Austria.

Bishii May 2014, dhakhtar Masri ah ayaa lagu soo eedeeyay gudniin gabadh12 sano jir ahayd oo uu ku sameeyey July 2013, tasoo dhimatay intay hawshu socotay. Tani waa qofkii ugu horeeyey oo lagu ganaaxay Masar gudaheeda inkastuu sharcigan jiro muddo dhowr sano ah.

Barnaamijka Tacliinta ee NSW qabtiisa laxidhiidha naafaynta saxaaxa dumarka waxay caawisaa dumarka ay saameyso naafaynta saxaaxa oo ay u fidisaa wadahadal lagu soo bandhigayo caafimaadka iyo macluumaad ku saabsan adeegyada caafimaadka ee ku yaala NSW oo u fududeeya doodaha ku saabsan caafimaadka iyo awoodgelinta ka qaybgalayaasha inay ku sameeyaan go'aanada iyo doorashooyin ku saabsan noloshooda.

Barnaamijku wuxuu ku hadaaqa uuna tababaraa rag iyo dumar kuwaas oo ku hadla laba luqadood oo noqonaya shaqaalaha bulshada u adeega ee u maamuli doona barnaamij 11 kulan ka kooban oo dumarka loo qabto kuna saabsan caafimaadka haweenka iyo barnaamij 7 kulan ka kooban oo loo qabto ragga kuna saabsan caafimaadka ragga. Labada barnaamij ayaa loogu talagalay ka dib markii wada tashi lala yeeshay xubnaha bulshada kaasoo ku saabsan wixii macluumaad ah oo naqonaya mid qiimo u leh muhaajiriinta ka soo degey NSW kana soo jeeda dhaqanada sameeya gudniinka.

Jawaabcelino ka yimid raggii iyo dumarkii ka qayb galay barnaamijyadaas ayaa waxay noqdeen kuwo fiican waxayna in badan ku dhaarteen in la joojiyo naafaynta xubinta taranka dumarka iyo gaar ahaan inayna ku samayn doonin gabdhahooda gudniinka. In badan ayaa la sheegay inay u gudbiyeen fariin ku saabsan gudniinka iyagoo la xiriiraya qoyska iyo qaraabadooda ee dibada jooga si ay ugu sheegaan waxyeellada daran ee gudniinku leeyahay waxayna ku booriyeen qaraabadooda in ay joojiyaan ku sameenta gudniinka gabdhahooda ku nool dalalkooda. Wixii macluumaad dheeraad ah ama caawimaad fadlan la xiriir Barnaamujka Tacliinta NSW ee ku saabsan gudniinka nambarada kala ah (02) 9840 3877 ama (02) 9840 3910.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijkeena soo booqo bogga internetka: